



UJEEEDO: CADDEYN HESHIIS KALA GADASHO DHUL BANAAN OO HARAA AH.

Maanta oo ay tariikhdu tahay 16/01/2024 Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayo Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa xafiiskeyga iigu yimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos Ku Xusan:-

<p><u>ISKA IIBIYE:-</u> AXMED CADDOW MAXAMED YAROW, Somali ah Hooyo: Afyar Joodax Dhicisow, Ku Dhashay: Muqdisho Sanadkii: 1928 jir Degan Muqdisho Lama Masawiray</p> <p><u>DAMIIN MAAL:-</u> Cabaas Axmed Caddow, Somali ah, Sita: Italiana Pass.I.r. MC0058386.</p>	<p><u>IIBSADE:-</u> DHIMBIL MAXAMED BARRE KULMIYE, Somali ah, Hooyo: Xabiibo Tooxow Cali, Ku Dhashay: C/buur Sanadkii: 1973, Degan Muqdisho</p>
<p><u>TILMAAMAHA DHULKA LA KALA IIBSANAAYO</u></p> <p>Dhul Banaan oo Ku yaal: Muqdisho, Degmada: Dayniile Ex-W/leey Cabirka Dhulka Waa Sidatan:- (Bari 7.70-M, Waqooyi 20-M Galbeed 10.5-M Koonfur 20-M), Looto No: 1399-P/Biis.</p>	<p><u>SOOHDINTA DHULKA</u></p> <p>Bari: Dhul dad, Koonfur: Dhul dad, Galbeed: Jid, Waqooyi: Dhul dad</p> <p><u>QIIMAHA DHULKA:</u> USD \$9,000 (Sagaal Kun oo Doolarka Mareykanka ah).</p>

B - Aniga oo ah **AXMED CADDOW MAXAMED YAROW**, Ahna Goofle, Waxaan qoraalkaan ku cadaynayaa aniga oo maskaxda iyo Caqligaba ka fiyoow cid I qasabtayna Aysan Jirin in aan ka Iibiyey kuna wareejiyey **DHIMBIL MAXAMED BARRE KULMIYE** Dhulkayga banana oo haraa ah, tilmaamihiisu sare ku xusan yahay, Waxaan kale oo aan Cadaynayaa in dhulkaan uu ka madax banaan yihiin rahan, xuquuq ama sheegasho cid kale, iyo wax kasta oo horjoogsan kara heshiiskan, Sidaas daraadeed Wixii Ceebaal ah, ee Ka Yimaada Dhulkaan Sida Danguud, Dukuminti Ka Horeeyey dukumintigaan, dukuminti been abuur ah ama Duris Sharci iyo Wixii La Mid ah aniga ayaa Mas'uul Ka ah, Waxaan Kale oo Cadeynayaa in aan Qaatay Dhamaan Lacagta Sare Ku Xusan.

T - Aniga oo ah **CABAAS AXMED CADDOW**, Waxaan Cadaynayaa in aan Damiinu Maal ka ahay Dhulka Sare ku Xusan iyo Iska iibiyaha Lagu Magacaabo **Axmed Caddow Maxamed Yarow**, Isla markaana aan Anigu Bixin doono Qiimigii lagu gaday Dhulkaan hadii wax Ceebaal ah ay ka yimaadaan.

J - Anigoo ah **DHIMBIL MAXAMED BARRE KULMIYE** Ahna Iibsadaha dhulkaan, Waxaan Caddeynayaa In aan ogsoonahay in Dhulkaan uu Haraa yahay Isla Markaana uusan Dukumini Laheyn hadii Wixii Ceebaal Ka Yimaada Waxaan u Raacan doonaa Iska iibiyaha iyo Damiinu Maalka Ka Sidoo Kale Waxaan Cadeynayaa in aan Ka Gudoomay Iska iibiyaha Milkiyada dhulkaan, Kuna qancay Heshiiskan

SAXIIXA ISKA IIBIYAHA DHULKA

AXMED CADDOW MAXAMED

SAXIIXA D-MAALKA

CABAAS AXMED CADDOW

SAXIIXA IIBSADAHHA DHULKA

DHIMBIL MAXAMED BARRE

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- AXMED CUMAR AXMED (AXMADEY)

2- AXMED MAXAMED BARRE

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 955/T.P.N/24, Tr. 16/01/2024, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee **1- Axmed Caddow Maxamed Yarow** Ahna (Iska iibiyey), **2- Cabaas Axmed Caddow** Ahna (Damiinu-Maal), **3- Dhimbil Maxamed Barre Kulmiye** Ahna (Iibsade) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Beecan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

NOOTAAYAHA

By: Cirro

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"

MASAWIRKA ISKA IIBIYAHA

AXMED CADDOW MAXAMED



MASAWIRKA IIBSADAHA

DHIMBIL MAXAMED BARRE



MASAWIRKA D-MAAL

CABAAS AXMED CADDOW



MASAWIRADDA MARKHAATIYAASHA

1- AXMED CUMAR AXMED (AXMADEY)



2- AXMED MAXAMED BARRE





FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 22/01/2024

Aniga oo ah **Dr. Maxamed Cabdullaahi Maxamed** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **C/raxmaan Axmed Maxamed** oo ka Wakiil ah Iibsade **Dhimbil Maxamed Barre Kulmiye** Dukumiintiga **Original** Beeca Dhulka ee **Rep No. 955/T.P.N/24, Tr. 16/01/2024**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca Iibsadaha	Dhimbil Maxamed Barre Kulmiye
Cabirka	Bari 7.70-M, Waqooyi 20-M Galbeed 10.5-M Koonfur 20-M
Ku Yaallo	Muqdisho, Degmada Dayniile
Lotto Lambar	1399-P/Biis
W.M.L	Sabarloog 22/555/0002, Tr. 05/05/0002 Rasiid Lam. 55, Tr. 08/06/0005
Taariikhda Beeca	16/01/2024
La Socoto	<input checked="" type="checkbox"/> Wasaarada Maaliyadda <input checked="" type="checkbox"/> Dowladda Hoose

Wakiilka Aniga oo ah **C/raxmaan Axmed Maxamed**, Leh Tel No. **0615347111**, Degan **MUQDISHO** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaaday Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Dhulka faah faahintiisu Sare ku cadahay uuna leeyahay **Dhimbil Maxamed Barre Kulmiye**.

Sawir

SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Dr. Maxamed Cabdullaahi Maxamed

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

C/raxmaan Axmed Maxamed